

Su'aalo caadi ah oo ku saabsan xannaanooyinka

Waa maxay xannaano?

Xannaanada inta badan waxaa loogu yeeraa "dagis".

Waajibaadka u yaalla xannaanadu waa in ay cunuga siiyaan daryeel fiican oo ayna hareeraha qabtaan cunga horu markiisa iyo wax barashadiisa, isla markaasna ay wax ka geystaan in ay waaliduuntu shaqeeyaan ama wax bartaan.

Yaa meel ka heli kara xannaanada?

- Cunuga jira inta u dhexaysa 1 – 5 sano ee ay waalidiintoodu shaqaynayaan ama ay wax baranayaan. Waxaa waqtiga loogu ogolaadaa hadba saacadaha uu waalidku shaqaynayo ama wax baranayo.
- Cunuga jira inta u dhexaysa 1 – 5 sano ee ay waalidiintoodu shaqo doonayaal yihiin oo isla markaasna ka diiwaan gashan xafiiska xiriirka shaqada ama fasaxa waalidka ku jira sida ku cad xeerka fasaxa waalidka iyadoo cunuga ka yar guriga lagu hayo. Waana 15 saacadood todobaadkiiba.
- Cunuga jira inta u dhexaysa 3 – 5 sano waxay xaq u leeyihiin waxa loogu yeedho "xannaanada guud" laga soo billaabo xilliga deynrta ah ee uu cunugu buuxiyay 3 sano nooca shaqo ee u doono waalidku haba hayee.
Halkan waxay waaliduunto kala doonarn karaa labo arrimood, in uu cunugu xannaanada dhigto 3 saacadood maalintiiba, 5 maalmood todobaadkiiba, wax cunto ah oo kuy jiraana ma jiraan. Wax qabadkuna waa bilaash. Ama in cunugu uu dhigto xannaanada 5 saacadood maalintiiba 3 maalmood todobaadkiiba. Wax qabadkuna waa kharash la bixinayo.
- Cunug u baahan meel ama boos oo ay hayso sabab gaar ah, tusaale ahaan haddii ay jirto cillada horu mat oo ku saabsan korriinka cunuga jismiyan iyo nafsiyan.

Iska jira hadda tani waa tilmaamid guud oo ku saabsan qofka meel ka heli kara xannaanada.

Goorma ayaa la billaabi karaa xannaanada?

Caadi ahaan sideedaba wuxuu cunugu billaabi karaa xannaanada ugu horrayn marka uu hal sano buuxiyo.

Intaas kadib adigan waalidka ah ayay ku jirtaa oo go'aanka ka gaaraya marka ay tahay xilli ku habboon in cunugaagu uu markaas billaabo. In badan oo carruurta ka mid ah way ku fiyoobaadaan inay xilli hore billaabaan xannaanada, meesha ay carruur kalana ku fiyoobaadaan guriga inay joogaan intii muddo ah. Taasina waa wax shaqsi shaqsi ah, waana adigan waalidka ah qofka ugu aqoonta badan xilliga ay ku habboontahay inuu cunugaagu billaabo xannaanada.

Goobaha xannaanooyinka ee Orsa waa kuwee?

Magaalada Orsa waxaa ku yaalla 14 goobaha xannaanooyinka oo ay degmadu leedahay, kuwaas oo loo kala qaybiyay 5 qaybood. Degmada Orsa waxaa xitaa ku yaalla xannaano madaxbannaan ee Grinden.

Sidee loo codsadaa?

Codso xilli fiican hadba sida ugu macquulsan adigoona buuxinayaa forma codsiga. U dir codsiga maamulka carruurta iyo wax barashada barn - och utbildningsförvaltningen (Foomka xitaa wuxuu ku jira bogga internetka ama na soo wac aan guriga kuugusoo ndirnee) marka uu cunugaagu meel ka helo waxaa lagu soo dirayaa xaqiijinta safka in cunugaagu lagu meeleeay saf.

Madaxa xannaanada isagaa go'aan ka gaadhaya cunuga boos laga siinayo xannaanada iyo waaxda uu ka dhiganayaoba. Isagoo raacaya xeerarka u go'an, tusaale ahaan toogaysiga iyo isu keenadi ku habboon carruurta iyo kooxayntoodaba Marka uu cunugaagu meel ka helo waxaad helaysaa fariinta meelaynta oo ay kuu soo dirayaan kaaliye yaasha daryeelka carruurta. Waxaana ku qoran macluumaadka lagu meeleeay cunugaaga iyo macluumaadka Qofka aad la xiriiraysid waxaada uu cunugaagu joogayo.

Watqaddaas waxaa ku jira saddex foom oo lagaa doonayo in aad soo buuxisid oo aad dib ugu soo dirtid muddo 10 casho gudahood ah, taas oo ah xaqiijin in aad aqbashay booskii lagu siiyay.

Caddeeynta dakhliga ku soo gala: adaa lagaa doonayaa in aad soo gudbisaa caddeeynta dakhliga ku soo gala si aad u bixisid ujrada daryeelka carruurta oo sax ah. Qofka aan soo gudbin caddeeynta dakhligiisa waxaa lagu meelaynta kadib markii la xusuusiyo meelaan dakhligoodu sarreeyo, taasina waxay noqon kartaa in lagugu soo dallacdo kharash badan oo Aadan bixiseen.

Heshiiska waqtiyada la joogayo waa in aad horay u sii buuxisaa waqtiga cunaagu joogayo si aan sawir uga sii haysano shaqaale inte la eg baannu u baahanaynaa. Heshiiska waqtiga cunugu joogayo xitaa waa muhiim in foom lagu qoro aragtiyaha ammaanka. Ogoow waa xaqiijintaada waxa lagu meelaynayo cunugaaga daryeelka carruurta. Heshiiska waxaa mararka qaar loo baahan karaa in caddeeyn la keeno, tusaale ahaan qasnadda shaqo la'aanta A - kassan.

Jadwalku waa mid muhiim u ahogaalka, kasoo loo baahanyahay si aannu u karno in aannu waxa qabadkeenna si fiican ugu qorshayno.

Waqti intee la eg bay qaadanayaa inta qofku boos kaga helayo?

degmadau waxay damaano qaadaysaa inay xannaanoyinkeeda mid uun ka mid ah boos kaa siiso muddo 4 bilood dhexdooda ah laga soo billaabo maalinta uu na soo gaadhay codsigaagu.

Waqri intee la eg bay qaadanaysaa carbin iyo la qabsi cunuga ?

mida dhab ahaantii ugu fiican waa 2 todobaad, laakiin waxay qaadan kartaa waqti ka qaaban ama ka dheer. Carbintu ama la qabsiintu waxay u dhacaysaa mid si tartiib tartiib ah loo kordhinayo inta uu xannaanada joogo. Maalinta ugu horraaysaa cunugaaga waad la joogaysaa maalintaas oo dhan. Maalinta ku xigtaana waxaa laga yaabaa in aad qol kale gashid oo isla aqalka ah wax yar waana lagu sii wadayaa. Laakiin xitaa taasi waa md ku xiran shaqsi shaqsi cunug kastaa hadba siga ku habboon.

Waa imisa kharashka goobaha xannaanada?

Ujrada lagu bixiyo booska aad ka heshid goobaha xannaanada waxay ku xiran tahay dakhliga gurigiina soo gala ee kuma ay xirna saacadaha uu cunugu joogo goobaha waqtiyada firaaqada. Taasina macnaheedu wuxuu yahay in qofka uu soo galo dakhli badan uu bixinayo kharash ka badan kan uusan soo galin dakhli badan ee meel ka helay goobaha xannaanada.

Ma lacag baa la bixinayaa winta cunuga la carbinayo?

Haa. Boosku waa lacag laga soo billaabo maalinta la qorsheeyo in la billaabo carbinta.

Goormee buu cunugaygu joogayaa goobaha waqtiyada firaaqada?

Cunugu wuxuu joogayaa goobaha cannaanada hadba inta uu uu waalidkiis shaqaynayo ama uu wax baranayo, oo lagu daray hadba masaafada waqtiga safarka. Carruurta dhiga 15 saac todobaadkiiba xannaanada waxay dhiganayaan hadba waqtiga ku habboon iyadoona la eegayo waqtiyadaku habboon wax qabadka ugu fiican cunuga. Waxayna u dhacaysaa iyadoo lagala tashanayo madaxa xannaanada.

Joogtaynta, cuntada, seeaxashada iyo wixii la mid ah.

Xannaanada waxaa lga bixiyaa quraac, qado iyo casariye u dhexeeya xilliyada cuntada niska hore iyo kan danbaba. Haddii cunugaagu leeyahay xajiin ama si kale oo gaar ah ugu baahanyahay daryeel cuntada ku saabsan waa in aad u sheegtaa marka aad booska codsanaysid iyo waaxda marka uu cunugaagu billaabayo. Carruurta seexanaysa duhurkii waxay caadi ahaan ku seexanayaan qadada kadib. Qaybaha intooda badan waxay carruurta ku seexiyaan bannaanka gaarigooda carruurta. Waa in aad cunugaaga u keentaa hug ku habboon iyo waliba dhar la calaamadayn karo, dhar dheeraad ah oo ay ku baddashaan iyo waliba xafaayado.

Haddii cunugaagu bukoodo ama jirradana?

Haddii cunugaagu bukoodo ama uu jirrado waa inaad sida ugu dhaqsaha badan ugu soo sheegtaa waaxda uu dhigto.

Ka fikir in aadan soo dirin cunug qandho ama cudurada faafa qaba dugsiga ama goobaha waqtiyada firaaqada. Taasna waxaa looga jeedaa in cudurka saf marka ah la joojiyo lana badbaadiyo carruuraha kale ee sababi kala duwan oo jira leh xasaasiyad ay ku qaadaan caalma ama hurgumada.

Calool xanuunka waxaa u yaalla "xeerka loogu yeero 48 saacadood" intaas kadib haddii uu cunugaagu ama adiga laftaada uu kaa baxay calool xannuunkii waa inaad Guriga joogtaa 48 saacadood macnaha (4 caano maal) inta aysan imaan goobaha waqtiyada firaaqada.

Haddaan anigu bukoodo ama jirradana?

Haddii aad bukooto ama aad jirratid waa in aad u sheegtaa arrintaas waaxdaada iska maalinta ugu horreeysa ee aad bukootid, markaas waxaad helaysaa in lagu siiyo macluumaad ku taxaluqa waqtiga uu cunugaagu joogayo goobta waqtiyada firaaqada, caddeeynta dhaqtarka iyo wax yaabo kale.

Haddii uu cunuga walaalihiis bukoodaan ama jirradana?

Haddii in ka badan hal cunug ay bukoodaan waa in aad usoo sheegtaa goobta waqtiyada firaaqada inuusan cunugaagu imaanayn sababtoo ah jirro ama bukto. Haddaba marka aad guriga joogtid cunug kaa jiraan dartiis, cunuga caafimaadka qabaa xaq uma lahan inuu joogo goobta waqtiyada firaaqada.

Haddii aannu is kala qaybinnana?

Haddii reerku ay kala qaybsadaan cunuga tusaale ahaan uu todobaadkan cunugu la joogo mid waalidkiis ka mid ah waxaa la samayn karaa waxa loogu yeero " laban laab ku meelayn" waase haddii laba waalidba ay u baahanyihiin boos.

Nooc kastaa oo is baddel ah waa in la buuxiyaa "*foomka is baddalka cinwaanka, xiriirka qooyaska, shaqo bixiyaha iyo wixii la mid ah*" la buuxiyaa oo loona diraa kaaliyaha daryeelka carruurta.

Haddii aan Shaqo la'aan noqdana?

Haddii aad shaqo la'aan noqotid cunugaagu wuxuu xaq u leeyahay 15 saacadood todobadkiiba inuu xannaanadadhigto. Waa inaad buuxisaa doofmka codsiga "Codsoga muddooyinka waqtiyada is baddalay" waxaana loo diraa waaxda daryeelka carruurta.

Haddii aan leeyahay shaqo uusan waqtigeedu joogto ahayna?

Haddii adigan waalidka ah aad leedahay shaqo waqtigeedu uusan joogto ahayn oo kala duwan waxaa dhici karta in mararka qaaarkood ay dhib noqoto in aad soo sheegtid jadwalkaaga, dakhligaaga iyo waqtiga uu cunugaagu joogayo labadaba. Midda muhiimka ah waa in ay waaxdu ogaataa waqtiyadaadqa shaqada ama wax barashada iyo saacadaha uu cunugaagu imaanayo ee uuna joogayo joogaa xannaanada..

Haddii uu ruuxu leeyahay dakhli is bad baddala oo ayna dhib ku tahay inuu soo gudbiyo dakhliga dhabta ah waa inuu iska qiyaasaa ama uu cel celiskiisa sheegaa. Waxaannu samayn doonnaa intaan mar uruurino in aannu daba gal kadis ah samayno annagoo u bar bar dhigayna dakhligii la soo gudbiyay iyo dakhligii la canshuuray. Waxaannu eegaynaa dakhliga hal sano oo dhan deedna waxaannu ku dhufanaynaa 12 bilood. Taasina waa adigan waalidka ah ayaa masuul ka ah in aad soo gudbisid dakhligaaga saxda ah. Haddii aadan hubin sida loo buuxinayo warqadda foomka ah waxaad la xiriirtaa kaaliyaha daryeelka carruurta.

Haddii aan u baahnahayna waqti saa'id ah goobaha waqtiyada firaaqada?

Haddii aad u baahantahay waqti dheeraad ah oo uu helo cunugaagu oo aad tusaale ahaan kordhisay waqtiyadii aad shaqaynaysay ama aad wax baranaysay waa in aad taas ku codsadaa foomka " codsiga in aan wax ka baddalo waqtiyada joogitaanka". Haddii ay baahidaadu ka badantahay sidii caadiga ahayd waa in aad baddalkeeda buuxiyaa foomka " codsiga ku saabsan is baddalka ku meel gaarka ah ee waqtiga joogitaanka" foomka waxaa loo dirayaa kaaliyaha daryeelka carruurta.

Haddii aan iska sii daayo booskaygana?

Sii deeynta booska waxaa lagu sameeyaa qoraal ahaan oo foomka la buuxiyo " sii deeynta booska". Waqtiga sii deeyntuna waa muddo bil ah laga soo billaabo maalinta ay sii deeyntaada soo gaarto daryeelka carruurta.

Guddiga carruurta iyo dhallin yarada way kaa sii deyn karaan booskaaga haddii aad lacagta bixin waysid ama aad ka maqnaatid wax ka badan 15 maalmood oo isku xiran adigoo aanna soo sheegin.

Haddii aan anigu qanci waayanna?

Waxaa jirta fursad aad ku soo gudbin kartid wixii aragtiyo ah, cabasho ah ama amaan ah adigoo kusoo qoraya bogga internetka ee maamulka carruurta iyo wax barashada. Waxaad gashaa bogga www.orsa.se oo markaasna sii gal barn och utbildning / kalagomål & synpunkter.

Xaggee baan ka heli karaa ogaal dheeraad ah?

Ogaal badan oo dheeraad ah oo ku saabsan waqtiyada firaaqada ah ee degmada Orsa waxaad ka helaysaa bogga internetka www.orsa.se sii gal barn & utbildning.

Foomamka iyo warqadaha waxaad helaysaa xitaa bogga internetka ee degmada hoosta barn och utbildning / blanketter.

Adiga xitaa mar kastaa waad soo dhowaan kartaa haddii haysid wuxuu Su'aalo ah ama is waydiin ah adigoo soo wacaya kaaliyaha daryeelka carruurta taleefankooda 0250-55 22 11